

Wada-xiriirka Bulshadeed

Xirfadda xaga la xiriirka ubadka waxaa si wanaagsan loogu horumarin karaa marka uu ubadka la dhaqmo dadka kale.

Isku day inaad;

1. Ku dhiirigelisid ubadkaaga inuu kula ciyaaro.

Fiira gaar ah sii alaabta lagu ciyaaro(toys)/ciyaarta uu ubadkaagu jecelyahay. Fiiri falalka dhacaaya. La ciyaar ubadkaaga, isla markaasina kala hadal waxaad sammeyneysid iyo waxaad arkeysid adigoo isticmaalaaya luqad ama erayo fudud.

2. Ku caawi ubadkaaga inuu ka qayb qaato ciyaarta markiisa.

Taasi waa bilowga isdhexgal bulshadeed oo dhexmara ubadkaaga iyo qof kale. Heesa heeso. Haddii ubadkaaga uu yaqaano heeso, u kaadi, kuna dhiirigeli inuu buuxiyo wixii markaa ku xiga. Ciyaar kubbadda. Isku tuura kubbadda qof waliba markiisa.

2. Ku dhiirigeli ubadkaaga inuu ku fiiriyo.

Wakhtiga ciyaarta waxyaabaha la qabto maalin kasta, kor u qabo shay (alaab) la sin wajigaaga, una sheeg ubadkaaga magaca shayga.

Xusuusnow, xitaa, ka hor inta caruurta aysan ku dhawaaqin ereyada, waxaay u sheegaan sababo kala duwan oo ay ku jiraan:

- “weydiin” wax badan
- “weydiin” shay
- “dhihid” see tahay/nabadgelyo
- “magacoow”